



Xidhista ama Daminta Adeegyada Guriga ku Jira (Utilities)

Marka masiibo dhacdo, badanaa waxay saameysaa ama waxyeleysaa mid ama ka badan oo ah adeegyada gurigaaga ku jira. Waa muhiim inaad taqaanid meesha ay ku yaalaan meelaha xukumista ee ugu muhiimsan, iyo goorta iyo sida loo xidho ama loo damiyo.

Korontada

- Hel meesha uu ku yaalo iswiijka/furaha korontada ee ugu muhiimsan ama sanduuqa fiyuusyada, oo baro sida guriga looga damiyo nidaamka/sistamka korontada ee ku jirta.
- Haddii koronto-dhaliye loo isticmaalo kayd koronto, xusuuso inaad raacidid fariimaha shirkadda sameysay. Nalalka iyo qalabka si toos ah ugu xidh koronto-dhaliyaha ee ha ku xidhin nidaamka/sistamka korontada ee guriga.

Biyo

- Biyaha ka xidh barta saacadda/mitirka ama qalabka cabira biyaha ama barta biyuhu ka soo galaan guriga. Tani waxay biyaha wasakheysan ka joojin doontaa inay soo galaan biyo kululeyahaaga iyo tuubooyinka biyaha.
- Xidh furaha (valve) joojinta — u leexi midig. Tan si aad u sameyso waxa aad u baahan doontaa baanad gaar ah (valve wrench), oo laga helo dukaanka qalabka dhismaha. U hubso inaad haysatid qalabkaas oo si fudud u heli kartid oo uu diyaar kuu yahay.

Nidaamka bulaacadda

- U hubso in nidaamka bulaacaddu si sax ah u shaqeynayo ka hor inta aanad isticmaalin. Tani waxay ka hortagi doontaa wasakh soo gaadha gurigaaga, iyo suurtoagal ahaan, kaydka biyaha la cabo.

Saacadda/mitirka gaasta (sawirka hoose)

- Hel meesha ay ku taalo saacaddaada gaasta iyo furaheeda.
- Diyaar ha kuu ahaato baanad aad ku xidhid gaasta guriga soo galaysa.
- Haddii ay kuu urto gaasta dabiciiga ah ama gaasta “propane”, isla markiiba baxa oo ka taga aagga. Taga meel aan laga urin karin gaasta. Ha isticmaalin kabriid/taraq, shideyaasha sigaarka ama laytaro, iyo qalabka leh olol qaawan. Ha shidin iswiijyada korontada sababta oo ah dhimbiilaha ay sameeyaan ayaa shidi kara gaasta taasoo sababaysa qarax.
- Kaliya dami gaasta haddii aad ay kuu urto gaas ama aad maqashid sanqadh “fiish” leh. La xidhiidh shirkadda gaasta si dib loo daaro gaasta.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-
7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-033
Somali

